**UNITED NATIONS** **NATIONS UNIES**

**UNITED NATIONS POLITICAL OFFICE FOR SOMALIA**
UNPOS

9ka Luulyo 2012

As-Salaamu Calaikum,

Saaxiibadeyda qaaliga ah, waxaan maraynaa marxalad xasaasi ah ee geeddi-socodka nabadda Soomaaliya. Dhowr horumar oo la taaban karo ayaa la gaaray tan iyo markii iigu dambeysay ee aan warqad idiin soo qoray bishii Maarso. Waxaan aad ugu dhownahay inaan markhaati ka noqono mid ka mid ah dhacdooyinka siyaasadda ugu muhimsan ee jiilkan (waqtigan): taasoo ah in Golaha Qaran ee Ansaxinta Dartuurka Soomaaliyeed (NCA) oo ansaxiya qabyo-qoraalka dastuurka ku meelgaarka ah. Waddadii halkan la keentay aad bay u adkayd, waxayna lahayd leexleexad badan, godad iyo taagag lagu gufo iyo waxyaabo kale oo dadka horistaaga. Hase yeeshee, dadka Soomaaliyeed ayaa qabtay shaqo adag si ay uga tallawsadaan caqabadahan, dadaalkooduna wuxuu billaabay inuu miradheliyo. Saxiixayaasha geeddi-socodka Qorshe-Hawleedka (Roadmap) waxay 22kii bishii June saxiixeen Dastuurka Soomaaliya ee ku meelgaarka ah iyagoo jooga kulankii Saxiixayaasha ee ka dhacay Nairobi. Qabyo-qoraalka waxaa bartamaha bisha Luulyo loo gudbin doonaa Golaha Qaran ee Ansaxinta Dartuurka oo metelaya qaybaha kala duwan ee bulshada Soomaaliyeed, ayna soo xuleen koox 135 odey-dhaqameedyo ah, duubab dhab oo metela dhammaan qabiillada Soomaaliyeed iyagoo ku saleysan “hanaanka 4.5”. Saxiixayaashu waxay kaloo ku heshiiyeen dhowr hanaan oo la doonayo in geeddi-socodka horey loogu dhaqaajiyo waqtiga yar ee haray intuusan dhammaanin xilliga ku meelgaarka ah 20ka bisha Agoosto, waxaana ka mid ah sameynta Kooxda Kormeerka Caalamiga ah iyo borotakoollo dhowr ah ee lagu asaasayo Guddiga Farsamo ee Xulidda, Guddiga Fududeynta Farso ee Saxiixayaasha, Golaha Qaran ee Ansaxinta Dartuurka iyo Baarlamaanka Federaalka ee Cusub. Mid kasta oo ka mid ah hay’adahan wuxuu cayaarayaa kaalin muhimsan oo ah “ilaalin tayo” si loo ilaaliyo hanaanka siyaasadda loona xaqiijiyo ansaxinta dastuurka ku meelgaarka iyo diyaarinta doorashooyinka uu Baarlamaanka cusub ku dooranayo Madaxweynaha, Gudoomiyaha Baarlamaanka iyo ku xigeenadiisa.

Ansaxinta dastuurka ku meelgaarka ah waa arrin taariikhi ah. Hase ahaatee, halkan aan caddeeyo arrin muhim ah: ansaxintan ma noqon doonto meesha ugu dambeysa ee geeddi-socodka dastuur sameynta ee waxay noqon doontaa billowga cutub (bog) cusub. Dadka Soomaaliyeed waxay heli doonaan fursad ku filan oo ay qabyo-qoraalka wax kugu daraan waxna kaga bedelaan xilliga ka dambeeya bisha Agoosto ka hor intaan la gaarin afti dadweyne ee la qaban doono ka hor intuusan dhammaanin xilliga kowaad ee baarlamaanka cusub. Dastuurka qabyo-qoraalka ah wuxuu si buuxda u waafaqsanyahay Shareecada Islaamka waxaana qoray dad Soomaaliyeed markay la tashadeen dadka Soomaaliyeed, gaar ahaan Guddiga Dastuurka Federaalka Madaxabanaan iyo Guddiga (Xeeldheerayaasha) Khubarada. Bulshada caalamku waxay ku taageertay kharash iyo dhaqaale waxayna keentay khubaro ah la taliyeyaal farsamo oo arrinta ku xeeldheer oo ka qaybqaatay dastuur u dejinta dalal kale, sida Afghanistan, Ciraaq, Nepal, Indonesia iyo Koonfur Afrika. Dastuurku waa qoraal nool oo ah hanaan lagu dhammeynayo xilliga ku meelgaarka sida lagu qeexay Heshiisyadii Mbagathi 2004 iyo Jabuuti 2009. Dastuurku wuxuu billaabi doonaa sameynta hay’adaha joogtada ah, sida Baarlamaanka Federaalka Qaranka, Laanta Fulinta iyo Garsoor madaxbanaan. Dastuurka ku meelgaarka wuxuu noqon doonaa asaaska waxqabad iyo horumar la gaaro mustaqbalka. Wuxuu ilaalin doonaa xuquuqda aadanaha, xaqiijin doonaa ka qaybgal ku filan oo ay helaan haweenka, wuxuuna dammaanad qaadi doonaa xorriyaadka asaasiga oo takoor la’aan ah taasoo ku saleysan isirka, midabka, jinsiga (lab ama dhedig), afka, diinta, aragtida siyaasadeed ama mid kale, ama xaalado kale.

P.O. Box 48246 – 00100, Nairobi, Kenya Tel: +254 (0) 20 7626815 / 7626880. Fax: +254 (0) 20 7622697

Dhammaadka xilliga ku meelgaarka wuxuu noqon doonaa marxalad muhimsan oo laga gudbo, hase ahaatee waa inaan dhammaanteena billownaa inaan eegno marxaladda ka dambeysa 20ka Agoosto kana fikirnaa sida uu noqon doono mustaqbalka xaaladda siyaasadda Soomaaliya. Bulshada caalamku waxay garab taagnaan doontaa walaalaheena Soomaaliyeed. Farriirta ka soo baxday shirarkii caalamiga haa ee dhowaan lagu qabtay London, Istanbul, Addis Ababa, Nairobi iyo Rome waxay ahayd mid isku mid ah oo cad – Hadday goori goor tahay. Waa inaan wada shaqeynaa si aan uga fa'iideysano fursadan dahabiga ah ee nabadda. Caalamku eegayaa mustaqbalka Soomaaliya wuxuuna arkayaa dowlad dadka Soomaaliyeed ugu adeegta maamul wanaag waxtar leh oo lagu gaaro hay'ado dadka ka wakiil ah loona wada dhanyahay lalana xisaabtami karo heer kastaba.

Annago hore u sii soconayna, waxaa sii kordheysa muhimadda ay leedahay arrinta xasillinta Muqdisho iyo goobihii dhowaan la xoreeyay. Waxaa aad noo dhiirigelinaysa guulaha ballaaran ee ay gaareen ciidamada Dowladda KMG iyo xoogagga ay isbahaystaan sida Ahlu Sunna Wal Jamaaca iyagoo la kaashanaya AMISOM--oo dhowaan la ballaariyay laguna soo biiriyay cutubyo ka socda Kenya, Sierra Leon iyo Jabuuti--iyo weliba hawlgallada ciidamada Ethiopia. Kooxaha mucaaradka hubaysan waa laga guuleystay dhul badana waa laga qabsaday. Waxaan si gaar ah ugu farxay magaalada Balcad oo dhowaan la xoreeyay, taasina waxay dadweynaha deegaanka degmadan hodonka ku ah beeraha u ogolaaneysaa inay dhisaan noloshooda, waxayna keeni doontaa amni dheeraad ah ee ay hesho magaalada Muqdisho. Ka dib markii ciidamada Kenya "koofiyadda loo bedelay" (AMISOM ku soo biireen), ciidamada AMISOM waxay hadda ku fool leeyihiin inay qabsadaan magaalada xeebta ah ee Kismaayo oo ahayd meesha ugu weyn ee ay ka taliyaan Al-Shabaab. Waxaa kaloon ku faraxsanahay inaan idiin sheego in UNPOS, AMISOM iyo IGAD oo ay la socdaan hay'adaha kale ee Qaramada Midoobay ay si joogta ah u booqanayaan goobihii dhowaan la xoreeyay iyagoo la kaashanaya Dowladda KMG, si loo taageero sameynta guddiyada amniga deegaanada loona qiimeeyo baahida dadka deegaanka. Dowladda KMG ayaa horseed ka ah qoraalka qorshe xasillin oo buuxa oo xaqiijin doona ka wada qaybgalka dhammaan dhinacyada ay arrintu khuseyso.

Dhowr toddobaad oo keliya ayaa naga xigta intuusan dhammaanin xilliga ku meeelgaarka, waxaase nasiibdarro ah inay dhici karto in mar alla markaan u sii dhowaano 20ka Agoosto ay jiri doonaan dad isku dayi doona inay geeddi-socodka siyaasadda madaxfurasho u haystaan si ay u gaaraan danahooda siyaasadeed iyo kuwa gaarkaba. Dood xor ah iyo isafgaranwaa dhab ah mar walba way jiri doonaan – taasi waa qayb caafimaad leh oo lagama maarmaan ah oo ka mid ah hanaan kastoo dimuqraadi ah. Hase ahaatee, tallaabo cayiman baa laga qaadi doonaa kuwa doonaya inay carqaladeeyaan hanaanka socda. Bulshada Caalamku marna uma adkeysan doonto qaswadayaasha markaan sidan ugu dhowaanay guul dhab ah oo la gaaro. 20 sanno oo colaad ah ka dib, Soomaaliya ma kari karto in dheeraad ah oo la daahiyo oo dib loo dhigo.

Intaan ku jirno maalmahan haray intaan la gaarin 20ka Agoosto – iyo weliba toddobaadyada ku xigi doona – waxaa sii kordhi doona muhimadda ay leedahay isgaarsiinta lala yeelan doono, dhexna mari doonta dadka muhimka ah ee la xiriirno. Si taa loo gaaro, UNPOS si ballaaran bay dadka ula xiriiri doontaa, iyadoo adeegsanaysa hababka warbaahinta cusub si aan warka u faafino, idinka aad noola soo xiriirtaan oo aan warkiina helno. Laga billaabo maanta, waxaad nagula soo xiriiri kartaan Twitterka (@UNPOSomalia), waxaadna qoraallada iyo sawirrada ku daawan kartaan Flickr (flickr.com/photos/unpos), waxaadna maqaallada caadiga ah ee "leadership blog" ka akhrisan kartaan Tumblr (unposomalia.tumblr.com). Xisaabteena bogga Twitter-ka waxay wax ka qori doontaa hawsha

iyo waxqabadka Xafiiska. Intaa ka sokow, waxay na siin doontaa nidaam gurmad ah si aan idiin la socodsiino warsaxaafadeedyada iyo ogeysiisyada kale ee guud. Boggeena Hogaanka Blog-ga Tumblr-kana wuxuu u ololeyn doonaa nidaam isgaarsiin oo aan rasmi ahayn si aan u sii wado doodda aan ku billownay waraaqahan. Xisaabteena Flickr-ka waxay si gaar ah diradda ugu saari doontaa sawirada qiimaha iyo qaayaha leh ee laga helo Soomaaliya, si aan caalamka ugu muujino sida ay arrimuhu isubedelayaan gudaha dalka. Dukaamo cusub baa la furayaa maalin walba magaalada Muqdisho oo soo noolaanaysa—fadlan nagi soo booqo dukaankeena cusub ee dhijitalka ah (ama Internetka)

Gunaanadkii, aan ugu baaqo dhammaan Soomaalida oo ah dadka ay khuseyso talada geeddi-socodka nabadda inay si joogta ah ugu istaagaan dadaal loo galo sidii loo heli lahaa hanaan siyaasadeed oo salballaaran, loo wada dhanyahay dadkana wada metela oo dhasha xilliga ku meelgaarka ka dib. Soomaaliya waxay mudantahay hanaan siyaasadeed ee ku saleysan doorasho, ma aha keliya xulasho. Soomaaliya waxay mudantahay nabad, barwaaqo iyo horumar. Waxaa la gaaray goortii ay barakacayaasha iyo qaxootigu ku noqon lahaayeen guryahooda iyo dalkooda si ay u dhistaan noloshooda ee Soomaliya cusub. Waxaa la gaaray waqtigii ay Soomaaliya noqon lahayd dal midaysan. Annagoo wada socona baan riyadan la gaari la'yahay ka dhabayn karnaa.

Danjire. Augustine P. Mahiga